



Buug-yarahan waxaa iska leh: _____

Magac u yaaladayda waa: _____



2021 Summer of Learning

Ku soo dhowow Xagaaga Waxbarashada (Summer of Learning)!

La shaqee asxaabtaada iyo qoyskaaga si aad U SAHAMISHO, ABUURTO, oo aadna WADAAGTO sheekoo yinkaaga! Adeegso mala-awaalkaaga oo u aad nidaam kastoo aad jeceshahay. Wuxaan u mahadcelineynaa Hay'adda Maktabadda Dadweynaha ee Seattle (Seattle Public Library Foundation) iyo deeq-bixiyeyaa shooda taageeradooda Xagaaga Waxbarashada.

www.spl.org/SummerOfLearning • #SPLSummer2021



@SeattlePublicLibrary



@SeattlePublicLibrary



@SPLBuzz

Tim Sahami SHEEKADAADA

Qof waayeel ah weydii wax ku saabsan caruurnimadooda, u akhri sheeko aad jeceshahay qof ka mid ah qoyskaaga, ama la hel saaxiibbadaada waxyaabo cusub.



Habeen Xidig Leh



2021 Summer of Learning

@ArtBreakerBT

Miyaad tirin kartaa xiddigaha? Fiiri cirka habeenka oo tiri inta xiddigood ee aad kari karto. Markii aad lumiso tirinta ama aad daasho, ka fikir sida xiddig waliba ugu daro dhalaalka iyo quruxda cirka habeenka. Qor liis ku saabsan laba ama saddex shey oo aad sameyn kartid ama dhihi kartid si aad qurux ugu kordhiso adduunka. Xusuusnow, iyadoon loo eegayn inta uu la eg tahay ficalkaagu, waxaad ku dari kartaa dhalaal waxaadna samayn kartaa isbeddel!

Wadaagista Xikmada

Awoowayaasheen ayaa noo hibeyay xikadooda iyagoo talo u gudbinaya odayaashayada. Weydii laba qof oo kala duwan oo adiga kaa weyn hal jumlad oo talo ah oo ku saabsan ku noolaanshaha nolol wanaagsan. Halkan ku qor talooyinkooda. Hadda, u qor hal talo waayeellada kula nool, oo lana wadaag.



Sheekooyinka Ubaxa

Weligaa ma la yaabtay meesha ubaxyada ay aadaan xilliga qaboobaha iyo sababta ay u soo muuqdaan xilliga guga? Samee sheeko iyaga ku saabsan.

Waxay Dareemaysaa Sida Dabeeccadدا

Maalin diiran, cagahaaga oo kabo la'aan ah dhig doogga oo xir indhahaaga dhawr daqiqo, ka dibna qor wax ku saabsan sidaad dareemayo ka dib markii aad indhahaaga furtay mar kale. Ma dagantahay? Cabsi? Firfircooni?



Dad badan oo Seattle ku nool waxay ka kala yimaadaan adduunka oo dhan. Qaarkood waxay halkan joogeen jiilal, ama xitaa kumanaan sano. Xaggee ka soo jeedaan awoowayaashaada? La shaqee xubin qoyska ka mid ah si aad u raad raacdo jidadka ay dadkaagu u haajireen si u soo gaaraan halka aad hadda joogto, haddii ay ahayd safar adduunka oo dhan ah, ama gudaha Woqooyi-galbeed ee Baasifigga. U sawir waddadan sidii khariidad ama u qor sheeko ahaan.



Taariikhdaada

Wax badan kaga baro taariikhda xaafadaha badan ee gaarka ah ee Seattle gudaha "Explore Seattle Neighborhood History" (Baar Taariikhda Xaafadaha Seattle) Tilmaamaha Sahaminta ee! www.spl.org/SeattleNeighborhoodHistory

Abuur SHEEKADAADA

Adeegso mala-awaalkaaga oo abuur farshaxanno kuu gaar ah xagaagan. Waad adeegsan kartaa nooc kasta oo farshaxan ah si aad ugu sheegto sheekadaada – qoob ka ciyarka, gabayada, dhoobada – wax kastoo qalbigaaga la hadla.

Wax aan Caadi ahayn

Haddii aad dooran laheyd hal awood oo weyn si aad adduunka uga dhigto meel wanaagsan maxay noqon laheyd? Maxaad badali lahayd maxaase ku kalifay?

Farxadda Gudaha

"Gudahayga farxad ayaa ku jirta. Farxad ayaa gudaha iigu dhex jirta. Taasi waxay u dhalaalaysaa una diiran tahay sida qorraxda oo kale." Zetta Elliott, qoraa

Sawir ama qor farxadda ku jirta gudahaaga. Ku dar dadka, meelaha, waxyabaha iyo riyooinka kuu keenaya farxad. Isku laab oo meel walba ku qaado.



@_AXSM



Qor gabay "Waxaan Ahay" ah adigoo buuxinaya meelaha banaan:



Waxaan ahay: _____
(waqtigaa ugu jeceshahay maalinta)

Waxaan ahay: _____
(bulshada aad ku dhex nooshahay)

Waxaan ahay: _____
(xayawaanka aad ugu jeceshahay iyo sababta)

Waxaan ahay: _____
(wax aad jeceshahay oo aad hadda arki karto)

Waxaan ahay: _____
(buugga aad ugu jeceshahay ee aad akhrisay)



2021 Summer of Learning

Wadaag SHEEKADAADA

Waxaa jira siyaabo badan oo loo abuuro sheeko – ereyo ahaan, sawirro, midab, qoob ka ciyaarka, iyo qaabab kaloo badan. Marka baashaal oo sheekooinkaaga la wadaag qoyskaaga, asxaabtaada iyo deriskaaga!



2021 Summer of Learning

Bariis ayaa ugu fiican!

Qof walba bariiska wuu jecel yahay! Waa mid ka mid ah cuntooyinka ugu caansan adduunka. Waxay u muuqataa dhaqan walba – qoys walba – inuu leeyahay dheriyo u gaar ah, cuntooyin, iyo noocyo dhadhan iyo udgoon. Weydii mid ka mid ah cunto kariyeyaasha kula nool: Sidee u karisaa una cuntaa bariiska? Dhakhso? Jaalle? Toonta? Yaasmiin? Subag lagu daray? Basmati? Duurka ka baxa? Sawir ama qor natijjooyinkaaga oo la wadaag saaxiib ka baxsan qoyskaaga si aad u barbar dhigto cuntada sida loo kariyo!



Playland 2000

Warqad u qor saaxiibkaa kuugu dhow ama qofka aad ugu jeceshahay una sheeg sababta ay u yihii saaxiibkaaga ugu fiican ama qofka aad ugu jeceshahay.

Haddii aad dhisi lahayd garoonka UGU WANAAGSAN abid, sidee u ekaan lahaa? La kulan saaxiibbadaa, naqshadee oo sawiro goobta ciyarta riyadaada ah, ka dibna fikradahiina isla wadaaga.



Mahadsanid, Saaxiib

Booqo Burke! Tikiyo muddaysan ee horay loo sii dhigay ayaa looga baahan yahay dhammaan booqdayasha Madxfak Burke oo ay ku jiraan xubnaha Burke, kuwa haysta kaarka Jaamacada Washington (University of Washington, UW), iyo caruurta jirta saddex (3) iyo ka yar - si loo ilaaliyo kala fogaanshaha jirka iyo maaraynta baaxada madxfakka. Fadlan la xiriir Madxfak Burke ka hor booqashadaada si aad tikidhada u dhigatid adoo iimayl u diraya burkevis@uw.edu ama wacaya 206-616-8616. Maalinta booqashadaada, fadlan soo qaado tigidhadaada, warqadaada Waxbarashada Xagaaga iyo maaskarada oo laga doonayo qof kasta oo kooxdaada ka mid ah. Qaabilaad bilaash ah ayaa loo heli karaa ilaa laba qof oo waaweyn iyo afar caruur ah inta u dhaxeysa Luulyo 1 iyo Disembar. 31, 2021. Dalabkan laguma dari karo qiimo dhimis kale ama barnaamijyo kooxeed la qorsheeyay.